# OWI:

## Kaxeynta Gaari iyadoo La Sakhraansan Yahay

Hagaha Fahamka Tallaabooyinka Xiga iyo Soo Celinta Shatiga Wadista.

OWIiowa@iowa.gov

## Sharci Ayay Tahay

Waa sharci darro in gaari lagu kaxeeyo iyadoo la hoos joogo saameynta khamriga iyo/ama daroogooyinka. Iowa Code 321J waxa ay qeexaysaa ciqaabaha lagu soo rogi karo dadka ku xadgudba sharcigan. Dadka Iowa ka wadda gaari ee dambi ku gala gobol kale waxa kale oo looga baahan yahay inay u hoggaansamaan ciqaabaha madaniga ah ee Iowa.

## Ciqaabaha

Dadka lagu helo dambiga OWI ee Iowa waxay wajahayaan ciqaabo ciqaabeed iyo kuwo madani ah. Maxkamaddu waxay go'aamisaa ciqaabaha ciqaabeed ee lagu soo rogi doono qofka dambiga lagu helay. Badanaa waxaa ka mid noqon kara, balse aan ku koobnayn, xabsi, ganaax, waxbarasho, qiimayn cudurka isticmaalka maandooriyaha, adeeg bulsho, iyo magdhaw dhibbanayaasha la siiyo. Xaaladaha qaarkood, maxkamaddu waxay tirtiri kartaa kiiska ama kama dalban karto qofka dambiga lagu helay inuu fuliyo waxyaabaha ciqaabta ah. Sharciga gobolka ayaa qeexaya ciqaabaha madaniga ah ee lagu soo rogo si qofku dib ugu soo ceshado shatiga wadistiisa.

## Soo Celinta Shatiga Wadista

Haddii shatiga wadista lagaa qaaday dambiga OWI ee ku xusan Iowa Code 321J (hadday sabab u tahay amar maxkamadeed ama tallaabo maamul), shatiga lama soo celin karo ilaa aad:

- Dhammayso muddada ka qaadista shatiga.
- Bixiso ganaax madani ah oo ah $200.
- Soo bandhigto caddeyn ah inaad dhammaysay koorsada darawalada cabitaanka iyo qiimaynta/daaweynta cudurka isticmaalka maandooriyaha ee gobolka lagu amray.
- La kulanto shuruudaha mas'uuliyadda dhaqaale.
- U hoggaansanto shuruudaha qalabka interlock, haddii ay khuseyso.
- U hoggaansanto barnaamijka 24/7 ee ka fogaanshaha khamriga/daroogada, haddii ay khuseyso.

## Koorsada Darawalada Cabitaanka

Iowa waxa ay ka doonaysaa shakhsiyaadka dembi ku gala Iowa ama darawalada Iowa ee dembi ka gala gobol kale inay dhammeeyaan koorso loogu talagalay darawalada cabitaanka. Iowa waxa ay adeegsanaysaa manhajka Prime for Life oo ah 12 saacadood. Xaaladaha qaarkood, maxkamaddu waxay kuu oggolaan kartaa ama kaa rabtaa inaad xabsigaaga iyo koorsada darawalada cabitaanka ku dhammayso hal barnaamij oo loo yaqaan barnaamijka 48-saac ama "barnaamijka usbuuca dhamaadkiisa." Waxaa jira goobo badan oo Iowa ku yaal oo bixiya barnaamijkan. Macluumaad dheeraad ah ka hel: educate.iowa.gov/higher-ed/owi-education

Haddii aad rabto inaad koorsada darawalada cabitaanka ka qaadato gobol kale, fadlan la xiriir Wasaaradda Waxbarashada ee Iowa si laguu caawiyo. Iowa ma aqbasho koorsooyinka darawalada cabitaanka ee lagu qaato onlayn.

Waxaa jira khidmad habayn ah oo ah $37.50 haddii aad koorsada darawalada cabitaanka ka qaadato meel ka baxsan Iowa. Khidmaddan looma baahna haddii aad koorsada ka qaadato gudaha Iowa. Waxaa kale oo jira khidmad raaxo ah oo ah $1.00 marka lacagta lagu bixiyo onlayn. Lacagta waxaa lagu bixin karaa money order ama onlayn iyadoo la adeegsanayo kaarka deynta/kaarka lacag bixinta ee: **stateofiowa.seamlessdocs.com/f/owiadmin**

## Qiimaynta Cudurka Isticmaalka Maandooriyaha

Shakhsiyaadka dembi ka gala Iowa ama darawalada Iowa ee dembi ka gala gobol kale waxaa looga baahan yahay inay dhammeeyaan qiimayn ku saabsan cudurka isticmaalka maandooriyaha oo ay sameeyeen qiimeeye/ xarun shati haysta oo gobolku ansixiyay, ayna raacaan talooyinka la bixiyo. Liiska xarumaha la oggolaaday ee Iowa waxaa laga heli karaa: **educate.iowa.gov/higher-ed/owi-education** Si aad u hesho caawimaad ku saabsan adeegyada gobol kale, iimayl u dir **OWIIowa@Iowa.gov** ama buuxi Foomka Codsiga Caawinta (Request Assistance Form).

## Dukumiintiyada

Caddeyn muujinaysa inaad dhamaysay shuruudaha waa in loo gudbiyaa maxkamadda iyo gobolka labadaba. Haddii aad dambi ku gasho gobol ka duwan kan aad shatiga ku leedahay, waxaa laga yaabaa in lagaa doonayo inaad dukumiinti u gudbiso labada gobolba. Dukumiintiyadu si toos ah uma gudbaan hay'ad ama gobol kale. Haddii aad dhamayso koorsada darawalada cabitaanka iyo qiimaynta/daaweynta cudurka isticmaalka maandooriyaha ee Iowa, dhammaystirkaaga waxaa lagu soo sheegi doonaa saraakiisha shatiga darawalada ee Iowa iyadoo ay bixisay hay'adda adeegyada ku siisay. Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad hubiso in dukumiintiyadaada loo diro xafiiska qareenka maxkamadda degmada lagu soo xiray. Haddii aad koorsada darawalada cabitaanka iyo/ama qiimaynta/daaweynta ka qaadato meel ka baxsan Iowa, adiga ayaa mas'uul ka ah inaad dukumiintiyada u gudbiso Wasaaradda Waxbarashada ee Iowa si loo farsameeyo.

## Liiska Hubinta ee Qofka OWI Dambiga Gala

- Ma dhamaysay koorsada la oggolaaday ee darawalada cabitaanka? Ma ku soo sheegtay dhammaystirka koorsada gobolka iyo maxkamadda?
- Ma dhamaysay qiimaynta cudurka isticmaalka maandooriyaha? Ma ku soo sheegtay dhammaystirka qiimaynta gobolka iyo maxkamadda?
- Ma laguu soo jeediyay inaad dhamayso daaweynta isticmaalka maandooriyaha? Haddii ay sidaas tahay, ma dhamaysay, ma lagu soo sheegay gobolka?
- Ma u gudbisay lacagta ganaaxa madaniga ah Wasaaradda Gaadiidka ee Iowa?
- Ma u gudbisay lacagta ganaaxa ciqaabta maxkamadda?
- Ma xirtay xabsiga lagaa doonayay?
- Waxaa laga yaabaa in lagaa doonayo inaad gaadhigaaga ku rakibto nidaamka furaha interlock, aad caddeyso inaad leedahay caymiska masuuliyadda gaadhiga, aad ka qayb gasho oo aad u hoggaansanto barnaamijka 24/7 ee ka fogaanshaha khamriga/daroogada, iyo/ama aad bixiso caddeyn muujinaysa halka aad degan tahay. La xiriir Wasaaradda Gaadiidka ee Iowa si aad u xaqiijiso.

# Shuruudaha

### Waa maxay Diiwaanka Wadayaasha Qaranka (National Driver Register)?

Diiwaanka Wadayaasha Qaranka (NDR) waa keyd xogeed kombuyuutar ah oo ku saabsan wadayaasha lumiyey ama laga joojiyay shatiga wadista, ama lagu helay dambiyo waaweyn oo la xiriira taraafikada oo weli saaran ciqaabo ay tahay in la fuliyo. Hay'adaha gaadiidka ee gobollada ayaa u gudbiya NDR liiska dadka lumiyay xuquuqda wadista, waxaana lagu soo rogaa "xayiraad" shatiga ay haystaan. Ka hor inta aan shatiga wadista la siin ama dib loo siin qof, xafiiska DMV ee gobolka ayaa hubiya diiwaanka; haddii qofkaas lagu arko liiska, shatiga waa laga diidi karaa. Shatiga qofka waxaa la hayn karaa ilaa dhammaan ciqaabihii la fuliyo. Marka xayiraadda laga qaado, diiwaan dambe lagama hayo NDR.

### Maxaa xayiraad loogu saaray shatigeyga wadista?

Dadka lagu qabto kaxeynta gaari iyagoo sakhraansan waxay wajahayaan ciqaabo madani iyo kuwo ciqaabeed labadaba. Maxkamaddu waxay go'aamisaa ciqaabaha ciqaabeed ee lagu soo rogi doono qofka dambiga lagu helay. Badanaa waxaa ka mid noqon kara, balse aan ku koobnayn, xabsi, ganaax, waxbarasho, qiimayn cudurka isticmaalka maandooriyaha, adeeg bulsho, iyo magdhaw dhibbanayaasha la siiyo. Sharciga gobolka ayaa go'aamiya ciqaabaha madaniga ah ee lagu soo rogo qofka dambiga galay si uu dib ugu soo ceshto xuquuqdiisa wadista. Kiisaska badankooda, darawalada dambi ku gala meel ka baxsan gobolkooda waxay la kulmaan ciqaabo gobolkii ay dambiga ka galeen iyo gobolkooda ama gobolka ay shatiga ku leeyihiin labadaba. Haddii aadan si buuxda u dhammeeynin shuruudaha, waxaa shatigaaga lagu saarayaa xayiraad Diiwaanka Wadayaasha Qaranka.

### Waa maxay qiimaynta cudurka isticmaalka maandooriyaha?

Qiimaynta cudurka isticmaalka maandooriyaha waxaa loo adeegsadaa in lagu ogaado haddii qofku yahay qof ku tiirsan maandooriyaha iyo inuu ka faa'iidi karo daaweyn. Qiimeeyaha waxa uu adeegsan karaa qalabyo ogaansho oo kala duwan si uu go'aan u gaaro. Marka qiimaynta la dhammeeyo, qiimeeyuhu waa inuu diyaariyaa warbixin kooban. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqul qiimayntan ah.

### Ma qaadan karaa koorsooyinka waxbarashada darawalada cabitaanka/qiimaynta ama qiimaynta cudurka isticmaalka maandooriyaha onlayn ahaan?

Iowa ma aqbasho fasallo/qiimayn onlayn ah. Koorsooyinka waa in lagu qaataa fasal jireed oo ay oggolaatay xarun uu gobolka ansixiyay.

### Halkee ka qaadan karaa koorsada waxbarashada darawalada cabitaanka ee Iowa?

Eeg **Liiska Bixiyeyaasha La Ansixiyay ee Waxbarashada Darawalada Cabitaanka ee Iowa** ama booqo **rb.gy/x06kvb**

### Halkee ka heli karaa qiimaynta cudurka isticmaalka maandooriyaha ee Iowa?

Eeg linkiga **"Find an Approved Provider Near You"** ee boggayaga internetka ama booqo **findtreatment.gov**.

### Ma jiraa waqti xaddidan oo lagu dhammeeyo shuruudaha?

Maya. Qof kasta oo lagu qabto dambiga OWI/DUI ee Iowa ama dadka degan Iowa ee dambiga ku gala gobol kale waa inay dhammeeyaan shuruudaha.

## Waa maxay ciqaabaha OWI?

Dadka lagu helo dambiga OWI ee Iowa waxay wajahayaan ciqaabo ciqaabeed iyo kuwo madani ah. Maxkamaddu waxay go'aamisaa ciqaabaha ciqaabeed ee lagu soo rogi doono qofka dambiga lagu helay. Badanaa waxaa ka mid noqon kara, balse aan ku koobnayn, xabsi, ganaax, waxbarasho, qiimayn cudurka isticmaalka maandooriyaha, adeeg bulsho, iyo magdhaw dhibbanayaasha la siiyo. Sharciga gobolka ayaa go'aamiya ciqaabaha madaniga ah ee lagu soo rogo qofka dambiga galay si uu dib ugu soo ceshto xuquuqdiisa wadista.

| Ciqaabaha CIQAABTA ee ka imanaya xagga Maxkamadda (COURT) | Ciqaabaha MADANIGA ah ee ka imanaya xagga Wasaaradda Gaadiidka (DOT) |
|---|---|
| Ganaaxyo | Inaad caddeyso inaad buuxisay shuruudaha mas'uuliyadda dhaqaale, haddii ay khuseyso |
| Xabsi | Koorsada lagu qasbay gobolka ee darawalnimada iyo cabitaanka (12 saacadood oo waxbarasho – koorsada Prime for Life) |
| Ciqaabo kale | Qiimayn cudurka isticmaalka maandooriyaha |
| Maxkamaddu waxay tirtiri kartaa dacwada haddii ay rabto | Haddii daaweyn laguu soo jeediyo, shuruuddan waa inaad dhamaysaa |
| | Caddeyso SR22, haddii ay khuseyso |

OGOW: Ciqaabaha madaniga ah waxaa lagu soo rogaa si qofka dambiga galay uu dib ugu soo celiyo shatiga wadista.

## Garsooruhu wuu tirtiray dacwaddayda OWI. Maxaa weli looga baahan yahay inaan qaato koorsada waxbarashada darawalada cabitaanka iyo qiimaynta cudurka isticmaalka maandooriyaha?

Iowa gudaheeda, qofka lagu soo oogay OWI waxa uu wajahaa ciqaabo ciqaabeed (xagga maxkamadda) iyo ciqaabo madani ah (xagga wadista). Marka qof lagu soo xiro OWI, nuqul ka mid ah warqadda eedeynta waxaa loo diraa maxkamadda iyo hay'adda gaadiidka (Wasaaradda Gaadiidka Iowa - IDOT) labadaba. Nidaamka maxkamaddu ma ogeysiiyo DOT marka dacwad la tirtiray. Waqti kooban ayaad u leedahay inaad ka dooddo dacwadda xagga IDOT. Haddii aan la ka doodin, IDOT waxay weli kaa doonaysaa inaad fuliso ciqaabaha. La xiriir IDOT adigoo wacaya 515-281-5251 si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan ka doodista dacwadda.

## Waa maxay fasalka 48-saac?

Iowa waxay ka doonaysaa qofka markii ugu horreysay dembi gala inuu xabsiga ku qaato 48 saacadood oo uu dhammeeyo koorsada waxbarashada darawalada cabitaanka. Qaar ka mid ah bixiyeyaasha koorsooyinka ayaa leh barnaamijyo isku dara shuruudda xabsiga iyo shuruudda waxbarashada.

Qofka dambiga galay wuxuu fasalka ku qaataa hotel maxalli ah halkaas oo uu ku hoos jiro xabsi-guri, waxaana laga doonayaa inuu u hoggaansamo baaritaanno lama filaan ah oo khamri/daroogo. Qiimaha barnaamijka 48-saac ah wuxuu ka koobanyahay kharashka koorsada iyo kharashka hoyga, cuntada, ammaanka, iyo baaritaanka. Marka uu garsooruhu ogolaado, qofka dhammeeya barnaamijka 48-saac ah looma baahna inuu xabsiga galo dambiga OWI awgiis.

## Ma loo aqbalaa kulamada AA inay beddelaan koorsada waxbarashada darawalada cabitaanka?

Maya. Iowa waxay ka doonaysaa qofka OWI dambiga galay inuu dhammeeyo koorsada waxbarashada darawalada cabitaanka oo lagu qaato fasal jireed.

**Ma buuxinayaan shuruudda waxbarashada darawalada cabitaanka ka qaybgalka kulan ku saabsan Saameynta Dhibbanaha ama tababar MADD?**

Maya.

**Markii la i joojiyay, waan diiday in la i baaro (ma siin muunad neef ama dhiig). Weli ma aha inaan u hoggaansamo ciqaabaha?**

Haa.

**Anigu kuma noolaan Iowa. Weli ma aha inaan qaato koorsada waxbarashada darawalada cabitaanka iyo qiimaynta cudurka isticmaalka maandooriyaha?**

Haa.

**Maadaama aanan ku noolayn Iowa, ma qaadan karaa koorsada waxbarashada darawalada cabitaanka meel ka baxsan Iowa?**

Haa. Iowa waxay aqbashaa koorsooyinka waxbarashada darawalada cabitaanka ee laga qaato meel ka baxsan Iowa haddii uu gobolka uu bixiyo ansixiyay, lagu qaato fasal jireed, uu socdo ugu yaraan siddeed saacadood, oo uusan noqon karin koorso onlayn ah.

**Sideen u heli karaa meel aan ka qaato koorsada waxbarashada darawalada cabitaanka ama meel aan ka sameeyo qiimaynta cudurka isticmaalka maandooriyaha gobol ka baxsan Iowa?**

Waxaan haynaa liiska xarumaha la ansixiyay oo dalka oo dhan ah. Fadlan buuxi foomka OWI/DUI/DWI Assistance ama booqo kntn.ly/a4065aa4 waxaana laguugu soo diri doonaa macluumaad.

**Waxaan rabaa inaan ogaado heerka khamriga ee dhiiggayga (BAC) markii la iga qabtay. Sideen ku heli karaa macluumaadkaas?**

La xiriir hay'adda booliiska ee ku xiray ama Wasaaradda Gaadiidka ee Iowa adigoo wacaya 515-281-5251.

**Waxbarashadayda iyo qiimayntaydii waxaan ku dhammaystiray meel ka baxsan Iowa. Intee ayay qaadataa in laga qaado xayiraadda diiwaankayga?**

Waxaa jira dhowr arrimood oo saameyn kara xayiraadda shatigaaga. Badanaa waxay qaadataa 48 saacadood in xayiraadda laga qaado marka dhammaan waxyaabaha soo socda la helo oo la farsameeyo:

- Lacag bixinta ganaaxa madaniga ah ee Wasaaradda Gaadiidka Iowa
- Shahaadada dhamaystirka koorsada waxbarashada darawalada cabitaanka
- Lacag bixinta khidmadaha habaynta koorsada darawalada cabitaanka haddii laga qaaday meel ka baxsan Iowa
- Dhamaystirka qiimaynta cudurka isticmaalka maandooriyaha
- Dhamaystirka daaweynta haddii lagu taliyay inta lagu jiray qiimaynta cudurka isticmaalka maandooriyaha
- Dhammaystirka muddada shatiga kaa qaadista
- Caddeynta caymiska SR22/warbixinta deganaanshaha, haddii ay khuseyso
- U hoggaansanaanta shuruudaha qalabka interlock, haddii ay khuseyso

**Anigu waxaan ahay darawal Iowa ah oo OWI lagu qabtay gobol kale. Maxaa la iga doonayaa?**

Iowa waxay kaa doonaysaa inaad buuxiso shuruudaha gobolka aad dambiga ka gashay iyo shuruudaha Iowa. Waxaad onlayn ka hubin kartaa shuruudaha soo celinta shatigaaga: mymvd.iowadot.gov/Account/Login

**Haddii aan ku dhammeeyo koorsada waxbarashada darawalada cabitaanka ee Iowa, ma u baahanahay inaan dirto wax dukumiinti ah si loo farsameeyo?**

Maya. Hay'adda aad koorsada ka qaadatay ayaa mas'uul ka ah inay si elektaroonig ah ugu soo gudbiso Wasaaradda Gaadiidka ee Iowa inaad koorsada dhamaysay.

**Goorma iyo sababtee ayaan u baahanahay inaan buuxiyo Warbixinta Deganaanshaha (Residency Statement)?**

Warbixinta Deganaanshaha waxaa loo adeegsadaa in lagu ogeysiiyo Wasaaradda Gaadiidka ee Iowa inaad ka guurtay gobolka Iowa. Qofka looga baahan yahay inuu gudbiyo caymiska SR22 laakiin aan deganayn Iowa wuxuu gudbin karaa Warbixinta Deganaanshaha si looga dhaafo shuruudda SR22.

**Daaweyn baan dhammeeyey. Weli ma u baahanahay inaan qaato koorsada waxbarashada darawalada cabitaanka?**

Daawayntu had iyo jeer ma laha qayb waxbarasho. Haddii daawayntaadu ay ku jirtay ugu yaraan siddeed saacadood oo koorsada waxbarashada darawalada cabitaanka ah, xarunta daawayntuna si cad ugu sheegto dukumiintiga dhammaystirka daawaynta, oo Iowa ay ansixiso, looma baahna inaad qaadato koorso kale oo dheeri ah. Koorsada darawalada cabitaanka waa inaad dhamaysaa haddii aanay ka mid ahayn daawayntaada.

**Ma awoodo inaan bixiyo kharashka koorsada waxbarashada darawalada cabitaanka ama qiimaynta cudurka isticmaalka maandooriyaha.**

Fadlan la xiriir bixiye kuugu dhow si aad u ogaato haddii ay hayaan barnaamij dhimista kharashka.

# Dukumiintiyada

**Waa maxay dukumiintiyada ay Wasaaradda Waxbarashada ee Iowa u farsamayso Barnaamijka Waxbarashada Darawalada Cabitaanka?**

Haddii aad qaadatay koorsada waxbarashada darawalada cabitaanka, qiimaynta cudurka isticmaalka maandooriyaha ama aad dhammaysay daawayn meel ka baxsan Iowa, Wasaaradda Waxbarashada ee Iowa ayaa farsamayn doonta dukumiintiyada dhammaystirkaaga oo si elektaroonig ah ugu soo gudbin doonta Wasaaradda Gaadiidka ee Iowa inaad dhamaysay shuruudaha. Haddii aad koorsada waxbarashada darawalada cabitaanka, qiimaynta cudurka isticmaalka maandooriyaha ama daawayn ka samaysay gudaha Iowa, hay'adda Iowa ee aad shuruudda ku dhamaysay ayaa mas'uul ka ah inay si elektaroonig ah ugu soo gudbiso Wasaaradda Gaadiidka ee Iowa. Hay'ad Iowa ah ayaa laga yaabaa inay hakiso macluumaadka dhammaystirka ilaa aad bixiso dhammaan kharashaadka aad ku leedahay adeegyada lagu siiyay.

# Lacagaha/Bixinta

**Ma jirtaa lacag lagu qaado dirista dukumiintiyada?**

Haa. Haddii aad koorsada waxbarashada darawalada cabitaanka ka dhammaysay meel ka baxsan Iowa, waxaa jira khidmad habayn ah oo ah $37.50. Tani waa lacag mar keliya ah waxaana la bixin karaa wakhti kasta. Waxaa kale oo jira khidmad raaxo ah oo ah $1.00 marka lacagta lagu bixiyo onlayn.
Ma jiro khidmad lagu qaado farsamaynta dukumiintiyada qiimaynta/daawaynta cudurka isticmaalka maandooriyaha.

**Sideen ku bixiyaa khidmadayda $37.50 ee habaynta dukumiintiyada?**

Waxaad lacagta ku bixin kartaa onlayn adigoo adeegsanaya kaarka deynta ama kaarka lacag bixinta (VISA, Master Card ama Discover) ee stateofiowa. seamlessdocs.com/f/owiadmin ama waxaad soo diri kartaa cashier's check ama money order oo lagu qoray Wasaaradda Waxbarashada ee Iowa adigoo isticmaalaya boostada cinwaanka hoose. Ma aqbalno jeegag shaqsiyadeed. Fadlan ogow in ay jirto khidmad raaxo ah oo ah $1.00 haddii lacagta lagu bixiyo onlayn.

**Iowa Department of Education**
**Drinking Driver Education Program**
**400 E 14th St**
**Des Moines, IA 50319**

**Waxaan ku leeyahay ganaax madani ah Wasaaradda Gaadiidka ee Iowa (IDOT). Ma ku bixin karaa onlayn?**

La xiriir IDOT si aad u ogaato inaad xaq u leedahay inaad ganaaxa ku bixiso onlayn:
at **800-532-1121** ama iimayl u dir ods@dot.iowa.gov.

# Xogta Xiriirka

**Sideen ula xiriiri karaa Barnaamijka Waxbarashada Darawalada Cabitaanka ee Wasaaradda Waxbarashada Iowa?**

Waxaad nala soo xiriiri kartaa adigoo isticmaalaya Foomka OWI/DUI/DWI Assistance ama booqo kntn.ly/a4065aa4.
Telefoon: 515-281-5251 Iimayl: owiiowa@iowa.gov
Saacadaha xafiiskayagu waa Isniin – Jimce: 7:30 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo CST.

**Sideen ula xiriiri karaa Wasaaradda Gaadiidka ee Iowa?**

Telefoon: **515-244-8725** Iimayl: ods@dot.iowa.gov.